



Xiriirka Warbaahinta: Jenna Bowman
Maareeyaha Isgaarsiinta & Hawlgelinta
Toos: 507-328-2229 | E-mail: jbowman@rochestermn.gov

Soo Saarid War degdeg ah

Maamulka Magaalada Rochester ayaa ku Dhawaaqay Xaalad Degdeg ah Iyadoo la Dardargelinayo sii wadidda Adeegyaha Magaalada

March 23, 2020 - ROCHESTER, MINN. – Caafimaadka iyo badbaadada bushadeenna Rochester waxay mar kasta tahay mudnaanta kowaad ee Maamulka Magaalada Rochester. Ilaa maanta, Governor Walz iyo sidoo kale Maamulka Degmada Olmsted County waxay si rasmi ah ugu dhawaaqeen xaalad degdeg ah iyadoo ay ugu wacan tahay COVID-19. Maamulka Magaalada Rochester waxa uu sameynayaa isla sidaas oo kale, iyadoo la rajeynaya in bulshada u caddaato in Maamulka Rochester yahay uuna sii wadi doono u hoggaansanaanta talo soo jeedinta amarradaas, sidoo kale ay awood u leeyihiin inay soo saaraan awaamiir dheeraad ah. Intaas waxaa dheer, in Maamulka Magaalada sii wadi doono ka shaqeynta sidii loo hubin lahaa in xubnaha bulshada iyo ganacsatada u helaan macluumaadka iyo ilaha ay u baahan yihiin.

Duqa Magaalada Kim Norton ayaa la wadaageysa “Aad bey muhiim u tahay in dhamaan xubnaha bulshada in ay si dhab ah u qaataan xaalada hadda magaaladeena, gobolkeena, qarankeena iyo aduunkaba wajahayaan. Waxaan codsanaynaa inaad raacdaan tilmaamaha iyo talooyinka hay’adaha caafimaadka dadweynaha. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay kala fogeynta bulshada, oo ay ka mid tahay baahida loo qabo in dhalintayadu ka fogaato isu imaatinka. Haddii qof gurigaaga ka mid ah uu buko, waxa ugu weyn oo aad ku caawini karta hakinta fiditaanka iyada oo qof kasta oo guriga ka tirsan inuu guriga joogo, sidoo kale.”

Maamulka Magaalada Rochester wuxuu sameyn doonaa waxkasta oo uu awoodo si uu u badbaadiyo uguna adeego bulshada inta lagu jiro qalalaasaha masiibada. Waxaan weydiisanaynaa in degane kasta uu raaco tilmaamaha ay bixiyeen hay’adaha caafimaadka dadweynaha ee maxalliga ah, gobolka iyo federaalka. Si guud ahaan, waqtigan xadirka ah, baahiyaha daryeelka shakhsiyadeed waxay kala yihiin:

- Guriga joog haddii aad jirran tahay ama ka mid tahay qaybaha nugul
- Joogtay kala fogeynta bulshada ee ah 6 tillaabo
- Ha isu imaanina 10 qof ama ka badan
- Ka fogow safarada aan muhiimka ahayn
- Adeegso gacmo-dhaqasho xoog leh saabuun iyo biyo; isticmaal gacmo nadiifiye markii gacmo-dhaqashada aysan suurtagal ahayn
- Wixii macluumaad dheeri ah, booqo: [Websaydka Waaxda Caafimaadka Minnesota](#) oo waliba leh [macluumaad luqado kala duwan ku qoran](#)

Magaalada ayaa dhowaan la wadaagtay laba dukumiinti oo muhiim ah kuwaas oo laga heli karo macluumaadka xiriirka iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan adeegyada Magaalada. Kuwaas waxaa laga heli karaa adigoo booqda websaydhka Magaalada ee [City’s COVID-19 website](#).

“Maamulka Magaalada Rochester wuxuu sii wadayaa inuu ka shaqeeyo goor kasta iyo maalin kasta si uu wax uga qabto isbeddelada ku imaan kara xaalada. Tan waxaa ka mid ah aqoonsashada iyo hirgelinta xaaladaha cusub ee sida aan ugu sii wadi karno bixinta adeegyadeena. Waxaan ku dhiirigelineynaa bulshada inay sii waddo la xiriirkayada, ”ayuu yiri Maamulaha Magaalada Steve Rymer.

###